

Caafimaadka Dadweynaha Toronto

Isbedelka Ku Meel Gaarka ah ee Raadinta Xiriirka

Tirada badan ee kiisaska COVID-19 ee Toronto awgeed, Caafimaadka Dadweynaha Toronto (TPH) ayaa si ku-meel-gaadh ah u beddelay sida aan ula xiriirno raadinta. Waxaan diirada saareynaa dadaalkeena xaaladaha halista ugu badan. Tan macnaheedu waa dadka qaba COVID-19 oo infekshankoodu yahay halista ugu badan ee kuwa kale.

Waqtigaan la joogo, TPH waxay la xiriiri doontaa dadka laga helay COVID-19 si loo:

- Xaqiijiyo natiijadooda tijaabada shaybaarka COVID-19.
- Qiimeeyo astaamahooda, oo go'aamiyo goorta ay bilaabeen.
- Xaqiijiyo awooddooda inay si nabadgelyo ah gooni isu-sooc u noqdaan ama u diraan Xarunta Go'doonka Iskaa Wax uqabso ee Toronto.
- Bixiyaan tilmaamo ku saabsan sida ay u ogeysiin karaan xiriiradooda khatarta sare leh.

TPH waxay weydiisanaysaa dadka laga helo COVID-19 inay cadeeyaan tirada xiriirada dhow ee ay la yeesheen 14 maalmood ka hor intaan astaamahoodu bilaaban. Xiriir dhow waa qof kasta oo ay in ka badan 15 daqiiqo ku qaateen meel kasta oo bulshada ka mid ah ama meel bannaan oo gudaha ah oo aan ka tirsanayn reerkooda. Macluumaadkan wuxuu ka caawin doonaa TPH inay aqoonsadaan dadka 10 ama in ka badan la xiriiray halista sare si ay uga caawiyaan maareynta xiriirka iyo dabagalka. TPH waxay sidoo kale adeegsan doontaa sahan internetka ah si loo ururiyo macluumaadka ku saabsan sida dadku u qaadeen cudurka si looga caawiyo yareynta faafitaanka COVID-19 ee magaaladeena. TPH waxay sii wadaa baaritaanka iyo ka jawaab celinta faafida isbitaalada, guryaha daryeelka muddada-dheer, guryaha howlgabka, hoyga, iskuulada, iyo goobaha daryeelka caruurta. Marka tirada kiisaska COVID-19 ee Toronto ay dib ugu noqdaan heer la maarayn karo, TPH waxay dib u bilaabi doontaa hawsheedii baadi goobka joogtada ahaa.

Noofambar 19, 2020